



Dulmar Kooban oo ah Ka-qaybgalka Arrinta Miisaaniyadda Sannad-Dugsiyeedka 2025 (FY25) ee SPPS

Hordhac

Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul (SPPS) waxay aad u qiimeeyaan talada bulshada maadaama aan ka shaqeyneyno inaan abuurno miisaaniyad ka tarjumeysa mudnaanta waxbarasho ee ardayda, qoysaskaiyo shaqaalaha aynu u adeegno. Degmada SPPS waxay la xiriiraysay ardayda, qoysaska iyo shaqaalaha si loo ogaado waxa ay qiimeeyaan waxbarashada iyadoo qabatay kulamo bulshada ka qeybgashay iyo ra'yi-uruurino la soo buuxiyay intii lagu jiray 2023. Waxaataladala soo ururiyay loo isticmaali doonaa in lagu wargeliyo go'aamada miisaaniyadda ee sannad-dugsiyeedka 2024-25, taasoo sidoo kale loo yaqaan sannad-maaliyadeed 2025 (FY25).

Talo-bixintii Inooga Timid Dhankaaga





Guud ahaan jawaabaha ra'yi-uruurinta iyo dhacdooyinka kaqaybgalka kulamada, waxaan ku ogaanay in bulshada SPPS ay si heer sare ah u qiimeeyaan:

- Ardayda oo si guud u dareenta amni (xag amniga jirka ah iyo xag fayy-qabka shucuurta ah)
- Awoodda ardayda ee ah xulashada iyo helidda fursado waxbarasho oo ay ku faraxsan yihiin
- Codadka iyo aragtida ardayda oo qeyb ka ah iskoolka iyo go'aan qaadashada
- Ardaydu oo diyaar u ah waxbarashada dugsiya sare ka dib iyo/ama shaqada xirfadaysan
- Waxbarasho la iska dhex arki karo oo tixgelineysa dhaqamada ardayda
- Qaadashada shaqaale ka tarjumaya dhaqamada ardayda

Ugu dambeyntii, **muhiimadda ay bulshadeenu u leedahay kobcinta dhaqan wanaagsan oo ah heer iskool iyo heer degmo lama xaddidi karo.** Ka-qaybgalka ardayda ee waxbarashadooda iyo dareenkooda ah inay qayb ka yihiin bulshada iskoolka oo wax xushmeeyo waa labo qodob oo aan kala harin.

Sida aynu Wadahadal kuula Yeelannay

Wakhtigii ay Dhacday

 Kulamada Bulshada ee Marnita's Table	<ul style="list-style-type: none">• Laba kulamo ay ka qaybqaateen bulshada oo uu martigeliyay ururka Marnita's Table ee ka dhacay Washington Technology Magnet School iyo Humboldt High School	Gu'ga 2023
 Kulamada Ardayda	<ul style="list-style-type: none">• Siddeed kulan oo lala yeeshay ardayda dugsiyada sare ee SPPS oo lagu qabtay xarunta Black Youth Healing Arts Center	Gu'ga 2023
 Kulamada Wadahadalka Bulshada ee Waxyaalaha Mudnaanta u leh	<ul style="list-style-type: none">• Shan kulan oo luuqad gaar ah oo ay qabteen golaha waaliddiinta degmada ee SPPS Parent Advisory Councils (PACs)• Afar kulan oo ay ka qaybqaateen bulshada oo oo lagu qabtay East African Elementary Magnet School, American Indian Magnet School, Como Park Senior High School iyo Humboldt High School	Dayrta 2023
 Ra'yi-uruurinta	<ul style="list-style-type: none">• Saddex ra'yi-ururin ayaa loo diray ardayda (fasallada 6-12), qoysaska iyo shaqaalaha	Dayrta 2023



**WADARTA KA
QEYBGALAYAASHA = 10,739**

Dulmar Guud oo Quseeya Wadahadallada Bulshada lala Sameeyay

Kulamada Bulshada ee Marnita's Table

Gu'gii 2023 waxay SPPS la shaqeysay urur bulsho oo la dhaho Marnita's Table si ay u martigeliso laba wada-hadal bulsho oo diiradda lagu saarayay ka doodista qorshaha istiraatiijiyadeed ee SPPS Achieves iyo shaqada degmada iyadoo la adeegsanayay maalgelinta Qorshaha Gurmada Mareykanka (ARP).

Kulamada Bulshada ee Marnita's Table	<p>Wadarta Ka Qaybgalayaasha waa 257</p> <ul style="list-style-type: none">• Washington Technology Magnet School April 25, 2023• Humboldt High School May 4, 2023
	<p>Wadahadallada waxaa diiradda lagu saaray isku xirnaansho bulsho oo dhab ah/ka mid ahaanshaha iskoolka, guusha waxbarashada, mustaqbalka ardayda ka qalin-jebinayso SPPS, qorshaha istiraatiijiga ah, amniga, iyo "sida la jeclaan lahaa inay iskoolladu noqdaan".</p>
	<p>Inkastoo kooxaha qaarkood ay si kala duwan uga wada hadleen ka mid ahaanshaha bulshada iskoolka, ka muuqashada, iyo dareenka ah in la soo dhaweeyay, misana waxaa caddaatay in qodobbadaan ay muhiim u yihiin kuwa ka soo qeybgalay kulanka.</p>
	<p>Ka qaybgalayaasha kulanka waxay farta ku fiiqeen fursadaha ardayda, qoysaska iyo xubnaha bulshada oo ah waxyaabo ay aad u qiimeeyaan.</p>
	<p>Waxbarashada dadka kale iyo dhaqankooda iyo sidoo kale dareenka guud ee ka muuqashada iskoolka waa qodobo si adag muhiim ugu ah.</p>
	<p>Labada qodob ee ugu sarreeyay xagga muhiimadda kuwii buuxiyay ra'yi-uruuriyaha waa:</p> <ul style="list-style-type: none">• Fikradda ah ka mid ahaanshaha bulshada iskoolka iyo SPPS• Muhiimada ku aaddan helidda cod iyo dhiibashada aragti ee ardayda

Natiijooyin dhameystiran oo dulmar ah waxaa laga heli karaa bit.ly/40TU9jX.

Kulamada Ardayda

Gu'gii 2023, arday ka socota siddeed dugsi sare oo ah SPPS ayaa ka qeybqaatay Kulamada Ardayda oo ay ku jireen asxaabtooda iyagoo yeeshay wadhadallo ay fududeeyeen Xafiiska SPPS Office of Equity. Koox walba oo arday ah waxay maalin buuxda ku qaadatay xarunta Black Youth Healing Arts Center iyagoo ka wadhadlayay waxyaalaha ay kala kulmaan dugsiga sare. Isu Duwaha Guud ee Gothard ayaa ka qeybgalay dhammaan siddeeda kulan oo ay ardaydu yeelatay. 431 arday ayaa ka qaybgalay siddeeddii maalmood ee ay kulamadu socdeen.

Kulamada Ardayda	<ul style="list-style-type: none">● Highland Senior High School April 27, 2023 105 Arday● Central High School May 3, 2023 88 Arday● Washington Technology Magnet High School May 9, 2023 40 Arday● Harding High School May 10, 2023 26 Arday● Open World Learning May 11, 2023 64 Arday● Como Park High School May 17, 2023 36 Arday● Johnson High School May 18, 2023 47 Arday● Humboldt High School May 25, 2023 23 Arday
	<p>Arday badan oo dhigata dugsiga sare waxay kala kulmaan dugsiyadooda sare inay yihiin goobo leh jawi iyo dhaqan inta badan caqabad ku ah waxbarashada. Ardaydu waxay dareemayaan in tani ay sabab u tahay:</p> <ul style="list-style-type: none">● awoodda iskoolka ee ah inuu caddeeyo, waalidka la soo xiriiro oo uuna xaqiijiyo ammaanka jir ahaaneed● in loola dhaqmo si ka duwan sida caadiga ah taasoo ku saleysan jinsiga, qowmiyadda, iyo dhaqanka● la'aanta matalaad ah xag qowmiyad iyo xag dhaqan ee fasallada gudahooda● cadaadis iyo welwel sii kordhaya● xaddidid ku aaddan helitaanka meelaha muhiimka ah ee iskoolka sida musqulaha● xiiso-yari ka muuqato macallimiinta, ixtiraam la'aanta loo hayo ardayda, iyo awood la'aanta macallinka ee ku aaddan inuu bixiyo waxbarasho muhiim ah oo soo jiidasho leh
	<p>Ardayda dugsiga sare waxay qiimeeyaan iskool leh jawi iyo dhaqan ay ka mid yihiin:</p> <ul style="list-style-type: none">● helitaanka meelaha iyo waxyaabaha muhiimka ah ee iskoolka● kasbashada saaxiibbo, kuwo ay is yaqaannaan iyo kuwo la fil ah● caawin ka timaadda shaqaalaha taageerada● macallimiinta oo manhajka ku xirta noloshu ardayda isla markaana muujiyo inay daryeel u hayaan inuu ardaygu noqdo mid guuleysta● dad waaweyn oo la aamini karo

Natiijooyin dhameystiran oo dulmar ah waxaa laga heli karaa bit.ly/47UFq2X.

Kulamada Wadahadalka Bulshada ee Waxyaalaha Mudnaanta u leh

Bishii October 2023, degmada SPPS waxay martigelisay afar kulan oo bulshadu ka soo qeygashay si ay uga caawiso inay bulshada ku wargeliso hannaanka dejinta miisaaniyadda sannad-dugsiyeedka 2025 (FY25). Kulanka koowaad wuxuu ahaa mid galaha waalidka oo dhan loo qabtay ee All Parent Advisory Council (All PAC) , afarta kale ee kulanna waxaa loo furay dhammaan shaqaalaha, qoysaska iyo xubnaha bulshada ee Saint Paul Public Schools. Qiyaastii 360 qof ayaa ka qeybgalay shanta kulan.

Kulamada Wadahadalka Bulshada ee Waxyaalaha Mudnaanta u leh	<ul style="list-style-type: none">● Dhammaan Golaha Waaliddiinta PACS ee Kulanka Wadahadalka Miisaaniyadda October 13, 2023 55 Ka Qeybgalayaal● East African Elementary Magnet School October 17, 2023 30 Ka Qeybgalayaal● American Indian Magnet School October 23, 2023 66 Ka Qeybgalayaal● Como Park High School October 25, 2023 139 Ka Qeybgalayaal● Humboldt High School November 16, 2023 70 Ka Qeybgalayaal
	Markii la weydiiyay dhammaystiro jumlada "Waxaan aaminsanahay ujeedada iskoolka loo aado waa...", jawaabaha caadiga ah waxaa ku jiray mowduucyada: <ul style="list-style-type: none">● Waxbarashada● U diyaarsanaanta kolleejada iyo shaqada xirfadeysan● Waxbarasho tixgelineysa dhaqamada ardeyda● Amniga● Diyaarsanaanta ka dib markii uu ardaygu ka qalin-jebiyo dugsi sare
	Ammaanka ayaa inta badan laga hadlay markii waalidka la weydiiyay, "Maxaad jeclaan lahayd inay ilmahaagu kaaga sheegaan khibraddooda iskoolka?" Ammaanka ayaa looga hadlay xag jir ahaaneed iyo xag shucuur labadaba.
	Xubnaha qoysaska ee dhammaan kooxaha luuqadaha kala duwan ku hadla waxay rabaan dhaqan wanaagsan oo ah heer iskool iyo heer degmo oo waxayna rabaan in carruurta faraxsanaadaan, ku mashquulaan tacliinta fasalka, xamaasadna u qaadaan waxbarashada.

Natiijooyin dhameystiran oo dulmar ah waxaa laga heli karaa bit.ly/47Rv5wb.

Ra'yi-uruurinta Waxyaalaha Mudnaanta u leh Bulshada

Ra'yi-uruurin lagu ogaanayo waxyaalaha mudnaanta u leh bulshada ayaa loo diray dhammaan qoysaska, dhammaan shaqaalaha, iyo ardayda SPPS ee fasalka 6 ilaa 12 bishii October 2023. Hoos waxaa ku qoran dulmar heer sare ah oo ku saabsan natiijooyinka ra'yi-uruurinta.

Lambarada iyo Qiimayaasha Jawaabta ee ku aaddan Ra'yi-uruurintii Waxyaalaha Mudnaanta u leh Bulshada

Koox	Tirada Dadka soo Jawaabay	Boqollayda Jawaabta
Ardayda (fasallada 6-12)	3,347	20.28%
Shaqaalaha	1,998	25.64%
Qoysaska	4,346	12.01%

Su'aalaha ra'yi-uruurintu waxay waalidka weydiiyeen su'aalo ku saabsan ujeeddada iskoolka loo aado, sida ay waalidku u sifeyn lahaayeen arday ka qalin-jebiyay degmada SPPS, iyo jowiga habboon ee ay jeclaan lahaayeen inuu iskoolku yeesho. Ra'yi-uruurinta qoysaska iyo ardayda waxaa lagu diyaariyay Ingiriis, Hmong, Isbaanish, Soomaali iyo Karen. Qoraal dhammeystiran oo ah ra'yi-uruurinta waxaa laga heli karaa bit.ly/3uv2HI2.

Waxyaalaha ugu Muhiimsanaa Ra'yi-uruurinta Waxyaalaha Mudnaanta u leh Bulshada

Arrimaha Helay Boqolleyda ugu Sarreysa			
	Ardeyda	Qoysaska	Shaqaalaha
Ardayda oo helo saaxiibbo	●		
Ardayda oo hesha hawlo tacliin oo ay xiiseynayaan	●	●	
Ardayda oo dareenta amni	●	●	●
Ardayda oo dareenta guul iyo farxad	●		
Ardayda oo noqda kuwo fikiro oo diyaarna u ah waxa xiga dugsiga sare		●	●
Iskoolka oo ka caawiyo ardayda inay gaaraan heer ay naftooda yaqaannaan, oo ay helaan ujeeddadooda nololaha ee shakhsi ahaaneed, iyo inay si fiican u fahmaan waxyaalaha mudnaanta u leh	●	●	●

Natiijooyin dhameystiran oo dulmar ah waxaa laga heli karaa bit.ly/3uv2HI2.

Wixii xog dheeraad ah ee ku saabsan waxyaalaha mudnaanta u leh bulshada, jadwalka miisaaniyadda sannad-dugsiyeedka 2025 (FY25), iyo si aad noola wadaagtid taladaada, fadlan booqo spps.org/FY25budget.